

Maarso 2017

Waalidiinta iyo Daryeelayaasha ardayda dugsiga sare ee BPS,

Dugsiga Boston Public Schools ayaa ayaa ku faraxsan inay ka mid ahaadaan ololaha National OUT for Safe Schools Campaign. OUT for Safe Schools Campaign ayaa ah olole loo abaabulay si loo xaqiijiyo in ardayda iyo waalidiinta oo khaniisinta ah ama Lesbian, Gay, Bisexual, Transgender, Queer, ama Questioning markii lasoo gaabiyo (LGBTQ) ay dareemaan in ay dhawyihiin oo na laga aqoonsanahay bulshooyinka dugsiga oo dhan.

Dugsiga ayaa u noqon karo dhalinyarada loo aqoonsado LGBTQ ama khaniisinta meel lagusoo dhawaynin ama aan laga aqoonsanayn. Dalka markii loo eego, ardayda LGBTQ ayaa ah kuwa ku sugan halis in la cagajuglaynta, cadaadinta iyo kuwa rabshada lagu sameeyo. Ardaydan ayaa sidoo kale ku dhibaatoodo niyad jabka, isticmaalka daroogada, waxay sidoo kale ugu badan yihiin ilmaha ay ku dhacdo guri la'aanta, iyo ka tagida dugsiga. Jawiga dugsiga ayaa saamayn ku yeelanin guusha ardayga oo keli ah, waxay sidoo kale saamayn ku ledahay samaanta maskaxda. Ololaha OUT for Safe Schools Campaign ayaa ah istraateji aanu isticmaalayno si aanu ka yeelno dugsigeena mid nabad geliyo leh, taageero siiyo ardayda iyo mid soo dhaweeyo ardayda oo DHAN.

Shaqaalaha dugsiga ayaa kaalin wayn ka qaato dhismaha bulshooyinka ee ardayda LGBTQ lagasoo dhaweeyo oo na nabad geliyo ku daremaan. Cilmi baarida ayaa muujinayso in hadii shaqaalaha soo dhex galaan markii hadalo xun ama cay ku saabsan jinsiga ama galmada ay maqlaan, ardayda ayaa halkaasi ku dareemi karaan nabad geliyo waxaana yaraanayo maqnaanshaha dugsiga.

Dugsiga Boston Public Schools ayaa ku faraxsan in ay ka qayb qaataan ololahan iyagoo u qaybinaayo shaqaalaha dugsiga ku salaysan calaamada OUT for Safe Schools. Markay xirtaan calaamada **OUT for Safe Schools badge**, shaqaalaha ayaa muujin doono in ay yihiin safiirada goobaha nabadda ah iyo saaxibada ardayda iyo waalidiinta loo aqoonsanahay LGBTQ. Waxay kaga kaalmayn doonaan sida ay ardayda ku helaan taageero dugsiga dhexdiisa iyo dibadiisa.

Ololaha National Out for Safe Schools Campaign ma ahan isbedel sharci ama manhaj, laakin dhiirada saari doontid muhiimada dhisidda dugsiga nabad geliyo taageero leh, tan oo ka mid ah sharciyada Samaanta BPS. Inkastoo dhiirada ololaha ay ahayn dhalinyarta LGBTQ, dadaalada loo sameeynayo dhisida bay'a soo dhawayn leh oo na aqoonsan ayaa ku lahaan doonto saamayn wanaagsan bay'ada ee dhalinyarta oo *dhan*.

Maclumaad dheeraad ah, fadlan la xidhiidh maamulaha dugsiga ama Kenya Elisa-McLaren, Maamulaha Deeqda Xoojinta Dhalinta iyadoo loo isticmaalayo Caafimaadka ama Empowering Teens Through Health: kelisamclaren@bostonpublicschools.org.

Waxaad ku mahadsantahay taageerka dadaaladeena inaan ka yeelno dugsiyada Boston Public Schools kuwo nabad geliyo iyo caafimaad leh oo na ah bulshad dugsiga oo soo dhawayso ardayda oo dhan, si loo xaqiijiyo in ay guusha gaadhaan.

Wadashaqayn Wacan,

Tommy Chang, Ed.D., Kormeeraha
Boston Public Schools